27. Marka laga Reebo ciduu ka raalli Noqday oo Rasuulah, Isagoo hor iyo gadaalba ka ilaalin.

إِلَّا مَنِ ٱرۡتَضَىٰ مِن رَّسُولٖ فَإِنَّهُۥ يَسۡلُكُ مِنۢ بَيۡنِ يَدَيۡهِ وَمِنۡ خَلۡفِهِۦ رَصَدٗا ٢٧

28. Si Eebe u muujiyo inay Gaadhsiiyeen Farriimihii Eebohood, Eebana waa koobay waxa Agtooda ah wayna u tirakoobanyihiin wax walba.

لِّيَعۡلَمَ أَن قَدۡ أَبۡلَغُواْ رِسَٰلَٰتِ رَبِّهِمۡ وَأَحَاطَ بِمَا لَدَيۡهِمۡ وَأَحۡصَىٰ كُلَّ شَيۡءٍ عَدَدَۢا ٢٨

Masaajidda Eebaa iska leh,laguna caabudaa,waase inaan cid kale lugu baryin luguna caabudin, Eebana wuxuu faray Nabiga inuu u sheego dadka inuu Eebe kaliya caabudi, shar iyo khayrna uusan hanannin, wax Eebe ka soo hadhay oo uu magangalina uusan jirin, hasayeeshee uu hanto xaqa iyo farriinta Eebe oo uu dadka gaadhsiiyo, ruuxiise Eebe iyo Rasuulka caasiya wuxuu gali Naar, gargaarana ma helo, waxa maqanna Eebe umbaa og inuu dhawyahay iyo in kale'iyo goortuu iman, hasayeeshee Eebe Rasuulladiisa uu ka raalli noqday umbuu waxyi wax ku ogaysiiyaa'isagoo ilaalin si ay u gaadhsiiyaan farriinta Eebohood, Eebana wax walba wuu koobay. Qataada wuxuu yidhi yuhuud iyo nasaara waxay ahaayeen kuwii Eebe wax la wadaajiya, markaasaa Eebe faray Nabiga in Eebe kaliya la caabudo. Al-Jinn (18-28).

## Suurat Al-Muzzammil

## سورة المزمل

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Nabiga) Isduuduubayow.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلۡمُزَّمِّلُ ١

2. Istaag habeenka (Tuko) wax yar Mooyee.

قُمِ ٱلَّيۡلَ إِلَّا قَلِيلٗا ٢

3. Nuskiisa tuko ama ka nusqaami wax yar.

نِّصۡفَهُۥٓ أَوِ ٱنقُصۡ مِنۡهُ قَلِيلًا ٣

4. Ama ka badi, Quraanka u akhri si fiican.

أَوۡ زِدۡ عَلَيۡهِ وَرَتِّلِ ٱلۡقُرۡءَانَ تَرۡتِيلًا ٤

5. Annagaa Kugu Dajin Hadal Culus (wayne).

إِنَّا سَنُلۡقِي عَلَيۡكَ قَوۡلٗا ثَقِيلًا ٥

6. Habeenka Saacadihiisa (oo la tukado) yaa ku daran khushuucda Aadna u toosan.

إِنَّ نَاشِئَةَ ٱلَّيۡلِ هِيَ أَشَدُّ وَطۡـٔٗا وَأَقۡوَمُ قِيلًا ٦

7. Maalintii waxaa kuu sugnaaday shaqa Dheer.

إِنَّ لَكَ فِي ٱلنَّهَارِ سَبۡحٗا طَوِيلٗا ٧

8. Magaca Eebana xus cibaadadiisana u go’.

وَٱذۡكُرِ ٱسۡمَ رَبِّكَ وَتَبَتَّلۡ إِلَيۡهِ تَبۡتِيلٗا ٨

9. Qorrax ka soobax iyo u Dhacba Eebaa iska leh, isaga Mooyee ilaah kalena ma jiro ee ka yeelo wakiil (la cuskado).

رَّبُّ ٱلۡمَشۡرِقِ وَٱلۡمَغۡرِبِ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ فَٱتَّخِذۡهُ وَكِيلٗا ٩

10. Kuna Samir waxay sheegi gaaladu, si Quruxsanna uga hijroo (iskaga tag).

وَٱصۡبِرۡ عَلَىٰ مَا يَقُولُونَ وَٱهۡجُرۡهُمۡ هَجۡرٗا جَمِيلٗا ١٠

11. Isu kaanna daa aniga iyo kuwa Beeniyay xaqa ee Nicmaysan wax yarna Sug.

وَذَرۡنِي وَٱلۡمُكَذِّبِينَ أُوْلِي ٱلنَّعۡمَةِ وَمَهِّلۡهُمۡ قَلِيلًا ١١

12. Agtannada waxaa ah caddibaad iyo Naarta Jaxiimo.

إِنَّ لَدَيۡنَآ أَنكَالٗا وَجَحِيمٗا ١٢

13. Iyo cunno lagu Margado iyo Cadaab daran.

وَطَعَامٗا ذَا غُصَّةٖ وَعَذَابًا أَلِيمٗا ١٣

14. (waxay ku dhici Arrintaasu) Maalinta Dhulka iyo Buuruhu Gilgilan, Buuruhuna ay noqon Tamuux socda*.

يَوۡمَ تَرۡجُفُ ٱلۡأَرۡضُ وَٱلۡجِبَالُ وَكَانَتِ ٱلۡجِبَالُ
كَثِيبٗا مَّهِيلًا ١٤

Nabiga «Naxariis iyo Nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee» wuxuu Eebe faray inuu xaqa Gaadhsiiyo dadka, cibaadadana badiyo gaar ahaan habeenkii wuxuuna ku mannaystay inuu ku dajiyay Quraan Sharaf leh, wuxuuna faray inuu badiyo xuska Eebe iyo cibaadadiisa, maxaa yeelay adduunka Eebaa iska leh’ilaahaan isaga ahaynna ma jiro, waxaa kaloos faray inuu Eebe tala saarto’dhibkana u adkaysto’gaaladana ka hijroodo isuna daayo iyaga iyo Eebe wax yarna sugo, maxaa yeelay Eebe agtiisa yaa cadaab iyo ciqaab u taalla gaalada maalinta qiyaame. Al-Muzzammil (1-14).

* bacaad daadanaya oon Lugta celinayn (dib u eegaha).

---

15. Annagaa idiin dirray Rasuul markhaati ah, sidaan ugu dirray fircoonba Rasuul.

إِنَّآ أَرۡسَلۡنَآ إِلَيۡكُمۡ رَسُولٗا شَٰهِدًا عَلَيۡكُمۡ كَمَآ أَرۡسَلۡنَآ
إِلَىٰ فِرۡعَوۡنَ رَسُولٗا ١٥

16. Fircoonna wuu Caasiyay Rasuulkii (Nabi Muuse). Firconna waxaan ku Qabannay qabasha Daran.

فَعَصَىٰ فِرۡعَوۡنُ ٱلرَّسُولَ فَأَخَذۡنَٰهُ أَخۡذٗا وَبِيلٗا ١٦

17. Ee seebaad Gaalooy uga dhawrsanaysaan Caddibaaddda Maalinta qiyaame ee carruurta Cirroole ka Yeeli Haddaad Gaalawdaan.

فَكَيۡفَ تَتَّقُونَ إِن كَفَرۡتُمۡ يَوۡمٗا يَجۡعَلُ ٱلۡوِلۡدَٰنَ شِيبًا ١٧

18. Samaduna Maalintaas Darteed ay la Dildillaaci Ballanqaadka Eebana waa wax Dhici.

ٱلسَّمَآءُ مُنفَطِرُۢ بِهِۦۚ كَانَ وَعۡدُهُۥ مَفۡعُولًا ١٨

19. Aayadahani Waa waano, Ee Ruuxii Doona Eeba xaggiisa jid ha uga yeesho.

إِنَّ هَٰذِهِۦ تَذْكِرَةٌ ۖ فَمَن شَآءَ ٱتَّخَذَ إِلَىٰ رَبِّهِۦ
سَبِيلًا ١٩

Diridda rasuulku ma aha wax gaar ku ahayd nabiga, ee waxaa jiray in Eebe diray nabiyo iyo rasuullo badan sidii nabi Muusihii fircoon loo diray oo is kibriyay oo Beeniyay'Eebana ciqaab daran ciqaabay, ruuxii wax Garad ahse waa inuu waano qaato una darbado maalinta qiyaame ee dhibka badan, Eebe Xaggiisana jid fiican uga samaysto. Al-Muzzammil (15-19).

---

20. Eebahaa wuxuu ogyahay Nabiyow inaad tukatid wax ka yar habeenka saddex Meelood laba iyo Badhkiis iyo saddex meelood meel, iyo in koox ka mida kuwa kula jira ay tukato, Eebana waa u qadaranyahay Habeenka iyo Maalintuba, wuxuuna Ogyahay inaydaan Koobi karin, wuuna Idinka toobad Aqbalay ee Akhriya wixii idiin Fududaada oo quraan ah, wuxuu Eebe ogyahay inay idin ka mid Noqon kuwa Buka iyo kuwo safri iyagoo dooni Khayrka Eebe iyo kuwo u dagaallami Jidka Eebe ee akhriya wixii idiin Fududaada oo Quraan ah, Salaaddana ooga Zakadana Bixiya Eebana wax wanaagsan daynsada Waxaad Naftiinna u hormarsataan oo Khayr ahna waxaad ka ogaandoontaan kana Heleysaan Eeba Agtiisa Isagoo khayr ah iyo Ajri wayn, ee Eebe Dambi dhaaf waydiista waa Dambi Dhaafe Naxariiste.

۞ إِنَّ رَبَّكَ يَعْلَمُ أَنَّكَ تَقُومُ أَدْنَىٰ مِن ثُلُثَيِ ٱلَّيْلِ وَنِصْفَهُۥ
وَثُلُثَهُۥ وَطَآئِفَةٌ مِّنَ ٱلَّذِينَ مَعَكَ ۚ وَٱللَّهُ يُقَدِّرُ ٱلَّيْلَ
وَٱلنَّهَارَ ۚ عَلِمَ أَن لَّن تُحْصُوهُ فَتَابَ عَلَيْكُمْ ۖ فَٱقْرَءُوا۟
مَا تَيَسَّرَ مِنَ ٱلْقُرْءَانِ ۚ عَلِمَ أَن سَيَكُونُ مِنكُم مَّرْضَىٰ ۙ
وَءَاخَرُونَ يَضْرِبُونَ فِى ٱلْأَرْضِ يَبْتَغُونَ مِن فَضْلِ
ٱللَّهِ ۙ وَءَاخَرُونَ يُقَٰتِلُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۖ فَٱقْرَءُوا۟
مَا تَيَسَّرَ مِنْهُ ۚ وَأَقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتُوا۟ ٱلزَّكَوٰةَ
وَأَقْرِضُوا۟ ٱللَّهَ قَرْضًا حَسَنًا ۚ وَمَا تُقَدِّمُوا۟ لِأَنفُسِكُم
مِّنْ خَيْرٍ تَجِدُوهُ عِندَ ٱللَّهِ هُوَ خَيْرًا وَأَعْظَمَ أَجْرًا ۚ
وَٱسْتَغْفِرُوا۟ ٱللَّهَ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌۢ ٢٠

Eebe waa ogyahay camalkeenna iyo dhaqdhaqaaqeenna habeen iyo dharaarba, waxaana laga rabaa ruuxa mu'minka ah inuu Eebe ku Xidhnaado oo toobad keeno, quraankana akhriyo, camalkiisuna noqdo mid habaysan oon ahayn mashaqo iyo dhibaato, illeen waxaa lagu shuqloomi karaa, jirro iyo tijaaro xalaal ah, waase in Eebe si joogta ah loo caabudo, salaadda, Zakada iyo khayrkana la hormarsadaa si wanaag, ajri iyo dambi dhaaf Eebe agtiisa looga helaa. Al-Muzzammil (20).

## Suurat Al-Muddaththir سورة المدثر

| | |
|---|---|
| Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista. | بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ |
| 1. (Nabiga) Isdadayow. | يَٰٓأَيُّهَا ٱلْمُدَّثِّرُ ١ |
| 2. Istaag oo dig. | قُمْ فَأَنذِرْ ٢ |
| 3. Eebahaana waynee. | وَرَبَّكَ فَكَبِّرْ ٣ |
| 4. Dharkaagana daahiri. | وَثِيَابَكَ فَطَهِّرْ ٤ |
| 5. Xumaantana ka hijroo (iyo Sanamyada). | وَٱلرُّجْزَ فَٱهْجُرْ ٥ |
| 6. Hana ku mannaysan Adoo Badsan(waxaad Bixisay). | وَلَا تَمْنُن تَسْتَكْثِرُ ٦ |
| 7. Eebahaa Dartiisna u Samir. | وَلِرَبِّكَ فَٱصْبِرْ ٧ |
| 8. Marka Suurka (qiyaame) la Afuufo. | فَإِذَا نُقِرَ فِى ٱلنَّاقُورِ ٨ |
| 9. Maalintaasu waa maalin ku Daran. | فَذَٰلِكَ يَوْمَئِذٍ يَوْمٌ عَسِيرٌ ٩ |
| 10. Gaalada oon u Fududayn. | عَلَى ٱلْكَٰفِرِينَ غَيْرُ يَسِيرٍ ١٠ |
| 11. Isukaanna daa Aniga iyo kaan Abuuray isaga oo kaligiisa. | ذَرْنِى وَمَنْ خَلَقْتُ وَحِيدًا ١١ |
| 12. Una yeelay Xoolo Badan. | وَجَعَلْتُ لَهُۥ مَالًا مَّمْدُودًا ١٢ |
| 13. Iyo Wilaal Jooga oo «Darban». | وَبَنِينَ شُهُودًا ١٣ |
| 14. Aan una waasiciyay Risqiga. | وَمَهَّدتُّ لَهُۥ تَمْهِيدًا ١٤ |
| 15. Oo haddana sii damci inaan u Badiyo. | ثُمَّ يَطْمَعُ أَنْ أَزِيدَ ١٥ |
| 16. Saas ma aha, ee kaas wuxuu diiday Aayaadkannaga. | كَلَّآ إِنَّهُۥ كَانَ لِءَايَٰتِنَا عَنِيدًا ١٦ |
| 17. Waxaana ku kallifi (Ku Dhibi) Cadaab daran. | سَأُرْهِقُهُۥ صَعُودًا ١٧ |

Waxaa sugnaatay in rasuulku (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) markuu waxyigu ku billawday uu is daday isagoo naxsan,markaas Eebe faray inuu kaco dadkana u digo, Eebana wayneeyo nadaafadana ku dadaalo, Xumaantana ka fogaado, wuxuu bixiyana uusan sheegsheegin, dar Eebana u samro, mu‘minka dhabta ahna saasaa laga rabaa, markase qiyaamadu timaaddo gaalo waxay la kulmi dhib iyo halaag, mana habboona in Eebihii ku abuuray ee kuu nicmeeyay eed waliba ka doonayso kordhin aad ka gaalawdid xaqiisana ka madax adaygtid, sida gaalka aayaduhu tilmaameen. Al-Muddaththir (1-17).

18. Gaalkaasu wuu Fikiray waxbuuna Goostay.

إِنَّهُۥ فَكَّرَ وَقَدَّرَ ١٨

19. Waxaana loo Lacnaday Siduu wax u goostay.

فَقُتِلَ كَيْفَ قَدَّرَ ١٩

20. Haddana waxaa loo Lacnaday siduu wax u goostay.

ثُمَّ قُتِلَ كَيْفَ قَدَّرَ ٢٠

21. Kadib wuxuu Eegay (si uu Quraanka u wax yeeleeyo).

ثُمَّ نَظَرَ ٢١

22. Wuuna Waji Macbuusay oo Uruuriyay.

ثُمَّ عَبَسَ وَبَسَرَ ٢٢

23. Markaasuu jeedsaday oo is Kibriyay.

ثُمَّ أَدْبَرَ وَٱسْتَكْبَرَ ٢٣

24. Isagoo Dhihi quraankani ma aha waxaan sixir la soo Guuriyay ahayn.

فَقَالَ إِنْ هَٰذَآ إِلَّا سِحْرٌ يُؤْثَرُ ٢٤

25. quraankani ma aha waxaan hadal Bashar ahayn.

إِنْ هَٰذَآ إِلَّا قَوْلُ ٱلْبَشَرِ ٢٥

26. waxaannu galin kaas (Naarta) saqara.

سَأُصْلِيهِ سَقَرَ ٢٦

27. Ma taqaannaa Naarta Saqara.

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا سَقَرُ ٢٧

28. Hilib iyo laf midna ma Reebto.

لَا تُبْقِى وَلَا تَذَرُ ٢٨

29. waxayna Doorisaa jidhka (oy Gubtaa).

لَوَّاحَةٌ لِّلْبَشَرِ ٢٩

30. waxaana kor jooga (ka shaqeeya) sagaal iyo toban malag (ama saf).

عَلَيْهَا تِسْعَةَ عَشَرَ ٣٠

Xaqoo la raaco yaa haboon, Ruuxiise ka Horyimaada oo Xumaan iyo dhagar maamula wuxuu la kulmi dhibaato iyo guul darro, sidii ku dhacday gaalkii waliid binu muqiira ahaa ee dulloobay laguna dilay dagaalkii waynaa ee badar, Eebana wuxuu ugu goodiyay kaas iyo wixii camalkiisa fala naar daran oo laf iyo lud midna aan reebaynin, malaa'igtuna waa junuudda Eebe ee naarta ka shaqaysa si loo ciqqaabo dambiilayaasha, Eebe ha naga kuriyee. Al-Muddaththir (18-30).

---

31. Ugama Aannaan yeelin naarta kuwa ka shaqeeya malaa'ig, tirana uma aannaan yeelin inay Gaaladu ku fidnoobaan Mooyeen, iyo inay yaqiin sadaan kuwa Kitaabka la siiyay, iyo inay kordhistaan kuwii xaqa Rumeeyay Iimaan, ayna shakiyinna kuwii Kitaab-

وَمَا جَعَلْنَآ أَصْحَٰبَ ٱلنَّارِ إِلَّا مَلَٰٓئِكَةً ۙ وَمَا جَعَلْنَا عِدَّتَهُمْ
إِلَّا فِتْنَةً لِّلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لِيَسْتَيْقِنَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ
وَيَزْدَادَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِيمَٰنًا ۙ وَلَا يَرْتَابَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ

وَٱلْمُؤْمِنُونَ ۙ وَلِيَقُولَ ٱلَّذِينَ فِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ وَٱلْكَٰفِرُونَ
مَاذَآ أَرَادَ ٱللَّهُ بِهَٰذَا مَثَلًا ۚ كَذَٰلِكَ يُضِلُّ ٱللَّهُ مَن يَشَآءُ وَيَهْدِى
مَن يَشَآءُ ۚ وَمَا يَعْلَمُ جُنُودَ رَبِّكَ إِلَّا هُوَ ۚ وَمَا هِىَ إِلَّا ذِكْرَىٰ
لِلْبَشَرِ ٣١

ka la siiyay iyo Mu‘miniintu, iyo inay Dhahaan kuwa Qalbiga ka buka iyo Gaaladu Eebe muxuu uga Jeedaa Tusaalahan, saasaa Eebe u dhumiyaa Ruuxuu Doono, una Hanuuniyaa Ruuxuu Doono, wax og junuuda Eebe oon isaga Ahaynna ma jiro, waxan la soo Sheegayna ma aha waano Dadka Mooyee.

كَلَّا وَٱلْقَمَرِ ٣٢

32. Waxaa sugan dayaxa ku Dhaartaye.

وَٱلَّيْلِ إِذْ أَدْبَرَ ٣٣

33. Iyo Habeenku Markuu Jeedsado.

وَٱلصُّبْحِ إِذَآ أَسْفَرَ ٣٤

34. Iyo Subaxu markuu iftiimo.

إِنَّهَا لَإِحْدَى ٱلْكُبَرِ ٣٥

35. Ee Naarta Saqara waa waxyaalaha waawayn Midkood (Balaayooyinka).

نَذِيرًا لِّلْبَشَرِ ٣٦

36. Waana Digniinta Dadka.

لِمَن شَآءَ مِنكُمْ أَن يَتَقَدَّمَ أَوْ يَتَأَخَّرَ ٣٧

37. Ruuxii Doona inuu Hormaro, iyo Ruuxii Doona inuu dib u dhaco, (waa Loodigay).

Eebe wuxuu doonuu falaa, naarta cidda ka shaqaynna wuxuu ka dhigay malaa’ig, si ciddii doontana ay u hanuunto’ciddii doontana u dhunto, junuudda Eebeheen iyo ciidammadiisana isaga umbaa og, aayadaha la soo sheegayna waa digniinta dadka, Eebana wuxuu ku dhaartay dayaxa, habeenku markuu jeedsado, subaxu markuu Iftiimo in Naarta Saqara ay ka midtahay Balaayooyinka waawayn iyo digniinta dadka’ruuxii doona inuu hormaro iyo kii doona inuu dib u dhacaba. Kitaabu-Baxar waxaa lagu sheegay in horumarka iyo dibu dhaca loola jeedo khayrkoo lagu hormaro iyo isagoo laga dib Dhaco. Ibnu cabbaasna wuxuu yidhi Ruuxii doona ha raaco daacada Eebe, kii doonana ha ka dib dhaco. Al-Muddaththir (31-37).

---

كُلُّ نَفْسٍۭ بِمَا كَسَبَتْ رَهِينَةٌ ٣٨

38. Naf walba waxay u xidhantahay waxay Camal fashay.

إِلَّآ أَصْحَٰبَ ٱلْيَمِينِ ٣٩

39. Hase yeeshee kuwa Midigta mari (Ehlu khayrka).

فِى جَنَّٰتٍ يَتَسَآءَلُونَ ٤٠

40. Waxay gali Jannooyin, waxayna iswaydiin.

عَنِ ٱلْمُجْرِمِينَ ٤١

41. Dambiilayaasha.

مَا سَلَكَكُمْ فِى سَقَرَ ٤٢

42. Iyagoo ku dhihi Maxaa idin Galiyay Naarta saqara.

قَالُوا۟ لَمْ نَكُ مِنَ ٱلْمُصَلِّينَ ٤٣

43. Waxayna ugu Jawaabi ka mid ma’aannaan ahayn kuwa Tukada.

44. Mana aannaan ahayn kuwa Quudiya Miskiinka.

وَلَمۡ نَكُ نُطۡعِمُ ٱلۡمِسۡكِينَ ٤٤

45. Waxaana ahayn kuwa la dhumbada kuwa xumaanta Dhumban.

وَكُنَّا نَخُوضُ مَعَ ٱلۡخَآئِضِينَ ٤٥

46. Waxaana ahayn kuwa beeniya Maalinta Abaalmarinta (Qiyaamada).

وَكُنَّا نُكَذِّبُ بِيَوۡمِ ٱلدِّينِ ٤٦

47. Ilaa ay Dhabtu Nooga Timaado (Geeridu).

حَتَّىٰٓ أَتَىٰنَا ٱلۡيَقِينُ ٤٧

48. Ma anfacayso kuwaas Shafeecada kuwa Shafeeca.

فَمَا تَنفَعُهُمۡ شَفَٰعَةُ ٱلشَّٰفِعِينَ ٤٨

49. Maxaase u sugnaaday oy waanada uga Jeedsadaan.

فَمَا لَهُمۡ عَنِ ٱلتَّذۡكِرَةِ مُعۡرِضِينَ ٤٩

50. ood u moodaa Dameero Diday.

كَأَنَّهُمۡ حُمُرٞ مُّسۡتَنفِرَةٞ ٥٠

51. oo ka Cararay libaax.

فَرَّتۡ مِن قَسۡوَرَةِۭ ٥١

52. Haddana wuxuu dooni midkasta oo ka mida warqado Qoran (kitaab).

بَلۡ يُرِيدُ كُلُّ ٱمۡرِيٕٖ مِّنۡهُمۡ أَن يُؤۡتَىٰ صُحُفٗا مُّنَشَّرَةٗ ٥٢

53. Saas ma aha Ee kama yaabayaan Aakhiro.

كَلَّاۖ بَل لَّا يَخَافُونَ ٱلۡأٓخِرَةَ ٥٣

54. Waxaa sugan in Quraanku waana yahay.

كَلَّآ إِنَّهُۥ تَذۡكِرَةٞ ٥٤

55. Ruuxii Doona yaana waantoobi.

فَمَن شَآءَ ذَكَرَهُۥ ٥٥

56. Mana Waantoobayaan in Eebe Doona Mooyee, Eebana wuxuu mutaa in laga Dhawrsado, wuxuuna Ehel u yahay inuu Dambi Dhaafo.

وَمَا يَذۡكُرُونَ إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُۚ هُوَ أَهۡلُ ٱلتَّقۡوَىٰ
وَأَهۡلُ ٱلۡمَغۡفِرَةِ ٥٦

Naf walba waxaa laga abaal marin waxay kasbatay, khayr iyo sharba, hase yeeshee ehlu jannuhu waxay waydiin ehlu naarka waxa naarta galiyay, waxayna ugu jawaabi: inayna tukan jirin, miskiinna quudin jirin, xumaantana tiimban jireen, qiyaamadan beenin jireen inta dhabtu uga timaaddo, kuwaas shafeeco wax uma tarto, maxaayeelay Xaqay ka jeedsadeen iyagood mooddo dameero bahal ka cararay, haddana midkastoo ka mida gaalada wuxuu dooni in warqad qoran samada looga soo dajiyo, dhabahaantuse waa inayna aakhiro ka yaabaynin, Quraankuna waana yahay, ruuxii doonana waantoobi, awoodana Eebaha in laga cabsado muta dambi dhaafna ehel u ah yaa iska leh. Al-Muddaththir (38-56).

## Suurat Al-Qiyaamah سُورَةُ القِيَامَةِ